

**CODSIYADII MAGANGALYODOONKA QAXOOTINIMO EE LA SAMEEYAY KAHOR 27.7.2018, AYAA LA FALANQEYNAYAA WAQTIGOO DHAN.**

Waxaa dhaqangalay sharci cusub oo ku saabsan waqtiga ugu badan ee la falanqeyn karo codsiyada magangalyo doonka ah 20.7.2018. Sida sharcigaas uu dhigaayo codsiyadii magangalyo doonka ahaa ee la sameeyay 20.7.2018 iyo wixii ka dambeeyay, waxaa falanqeyntoodu qaadan karaan ugu badnaan 6 bilood. Haddii falanqeynta codsiga ay waqti dheer qaadaneyso, waxaa Waaxda Socdaalku ay arinkaas si toos ah u soo ogeysiineysaa qofka macmiilka ah.

Codsiyadii la soo gudbiyay kahor 20.7.2018, iyagu ma khuseeyo arinkan ah mudada ugu badan ee falanqeynta 6-da bilood ah.

**Sharciga cusub ma kordhinaayo waqtiga falanqeynta codsiyada magangalyodoonka ah ee la sameeyay ka hor 20.7.2018**

Waaxda Socdaalku waxaa ay mar walba heysaa falanqeynta codsiyada magangalyada ee la sameeyay kahor 20.7.2018, iyadoo isla waqtigaasna ku dhinac wadda falanqeynta codsiyada ka dambeeyay kuwaas ee cusub. Qiyaasta waqtiga falanqeynta ee codsiyadaasna waxaa lagu sheegay wareygisii codsiga magangalyodoonka.

**Faahfaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan warbixinteena aan macaamiisha ugu talagalnay oo luqado kala duwan ah**

Faahfaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan isbedelka dhanka sharciga ah, waxaad ka akhrisan kartaa warbxinaha aan macaamiisha ugu talagalnay ee boggeena internetka :

[https://migri.fi/artikkeli/-/asset\\_publisher/20-7-alkaen-turvapaikkahakemusten-kasittelyaika-korkeintaan-6-kuukautta](https://migri.fi/artikkeli/-/asset_publisher/20-7-alkaen-turvapaikkahakemusten-kasittelyaika-korkeintaan-6-kuukautta).

Warbxinta macaamiisha waxaa lagu turjumay luqado dhowr ah oo kala duwan. Luqadaha kale ee la turjumay xitaa waxaad ka heli kartaa boggeena internetka: <https://migri.fi/esitteet-ja-julkaisut>.